DSHS
WASHINGTON STATE Department of Social and Health Services

United States Department of Agriculture
Food and Nutrition Service

Arjiga loogu talagalay Dheefaha Cuntada Musiibada

Application for Disaster Food Benefits

(Iyadoo la raacayo 7 CFR 280)

Shaabadda Taariikhda
Aqoonsiga Macmiilka

Tilmaamo: Codsigan u buuxi si daacad ah oo sida ugu fiican ah inta aad ogtahay. Haddii qoyskaagu ogyahay laakiin uu diido in uu bixiyo macluumaad kastoo aan waydiino, xaq uma yeellan doonno in uu helo dheefaha cuntada. Waxaad doorran kartaa qof in uu noqdo wakiilkaaga idman si uu u codsado gargaarka degdegka ah ee loogu talagalay qoyskaaga iyo si aad u isticmaashaan dheefahiinna cuntada. Qoyskaagu waa in lala yeeshaa wareysi qof ahaan ah oo dheefaha lagu helo. Waxaad u baahan doontaa in aad bixiso caddeyn aqoonsi oo loogu talagalay madaxa qoyskaaga iyo qof kastoo ah wakiilkaaga idman. Waxaan u baahan nahay aqoonsi sawir leh haddii la heli karo. Waxaa laga yaabaa in lagu weyddiisto in aad muujiso caddeynta in qoyskaagu uu ku noolaa ama ka shaqeynayay aagga musiibada ka dhacdey waqtigii musiibada. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato xaqiijinta kharashaad kastoo shaki ku jira. **Fadlan qor adiga oo isticmaalaya qalin khad leh. Haku qorin meelaha la madoobeeyay.**

Madaxa Qoyska (qof qaangaar ah oo magaciisa ka soo muuqan doonna akoonka Dheefaha Cuntada Musiibada)	**La-xaqiijiyay**
Ma doonaysaa in qof qoyskaaga ka baxsan uu dheefo u codsado qoyskaaga? (Wakiilka Idman) ☐ Haa ☐ Maya	Magaca Wakiilka (haddii uu jiro) **La-xaqiijiyay**
Cinwaanka Waddada Joogtada ah ee meesha aad ku nooshahay Magaalada Gobolka Koodhka Boostada	**La-xaqiijiyay**
Cinwaanka Ku-meelgaarka ah / Boostada Magaalada Gobolka Koodhka Boostada ☐ Ku-meelgaar ah ☐ Boostada	**La-xaqiijiyay**
Lambarka Telefoonka Joogtada ah (kuddar koodhka degaanka) ( )	Lambarka Telefoonka Ku-meelgaarka ah (kuddar koodhka degaanka) ( )
Lambarka kale ee xiriirka (kuddar koodhka degaanka) ( ) Nooca lambarka xiriirka: ☐ Shaqada ☐ Telefoonka Gacanta ☐ Farriin	

Qaybta A – Xaaladda Qoyska Waqtigii Ay Musiibadu Dhacday

	Haa	Maya
1. Qoyskaagu ma ku noolaa mise ka shaqeynayay aagga musiibada waqtigii musiibadu dhacday? Haddii ay haa tahay, fadlan ka jawaab su'aalahan soo socda:	☐	☐
Musiibadu miyay waxyeello ama burbur u geysatey gurigaaga ama hantidaada iskaa-u-shaqeysiga?	☐	☐
Qoyskaagu ma leeyahay wax kharashaad dheeraad ah oo ka dhashey musiibada?	☐	☐
Intii lagu guda jiray nadiifinta saameynta musiibada, qoyskaagu ma cunto ayuu soo iibsan doonnaa?	☐	☐
Musiibadu miyay keentay dib-u-dhaca, yaraanshaha ama joojsiga dakhliga qoyskaaga?	☐	☐
Qoyskaagu ma haystaa wax lacag caddaan ah ama lacag ugu jirta xisaab jeeg ama kayd oo aadan heli karin iyadoo sababtu tahay in bangigu u xiran yahay sababo la xiriira musiibada?	☐	☐
Ma jiraa qof ka tirsan qoyskaaga oo u shaqeeya DSHS?	☐	☐

2. Maka heshay dheefaha Cuntada Aasaasiga ah (Basic Food) ama kaalmo cunto oo ka timid barnaamij Qabiil (Tribal program) bishii ay musiibadu dhacday? ☐ Haa ☐ Maya

   Haddii ay haa tahay, sheeg: _____ degmada: _____

   Haddii ay haa tahay, cuntadaada ama kaarkaaga EBT miyay ku xumaadeen musiibada? ☐ Haa ☐ Maya

   Haddii ay haa tahay, waa maxay qiimaha lacageed ee cuntada lagu iibsaday dheefaha cuntada ee aad ku waysay musiibada: $_____

   Nooca khasaaraha: ☐ Kaarka EBT ☐ Dheefaha EBT ☐ Cuntada lagu soo iibsadey SNAP ama dheefaha Cuntada Aasaasiga ah ☐ Kale: _____

   Taariikhda aad khasaaraha oggaatey: _____

Liis ku qor xubnaha qoyskaaga, oo aad adiga ka mid tahay, ee adiga kula noolaa waqtigii musiibada. **Haddii aad si ku meelgaar ula joogto qoys kale musiibada awgeed, haku darin liiska xubnaha qoyskaasi.** Ku qor liiska xubin kastoo qoyska ka tirsan qaybta B. Liis garee dakhli kasta ee xubnaha qoyskaagu ay heleen ama ay filayaan in ay helaan inta uu socdo Barnaamijka Gargaarka Cuntada Musiibada. Haddii dakhliga uu ka yimaado shaqo, liis garee qadarka guriga loo qaato. Lagama maarmaan ma ahan in aad bixiso lambarrada damaanada bulshada (SSN), laakiin waxtar ayay leedahay. Kuwan waxaa loo isticmaali doonnaa in lagu aqoonsado xubnaha qoyskaaga iyo in la hubiyo in ay u qalmaan dheefaha cuntada. Waxaa sidoo kale loo isticmaali doonnaa iswaafajinta kombiyuutarka, dib-u-eegisyada barnaamij ama baaritaanno.

Qaybta B – Xubnaha Qoyska (Ku lifaaq waraaq si loo helo meel bannaan oo dheeraad ah)				**Qaybta C - Dakhliga**	
Magaca	Xiriirka uu laleeyahay Madaxa Qoyska	Lambarka Dammaanada Bulshada	Taariikhda Dhalashada	Isha / Nooca	Qaddarka
	Naftaada				

Qaybta D. Liis garee dhammaan lacagta kaashka ee uu qoyskaagu heli karo inta lagu jiro musiibadan.

Qaybta D – Kheyraadyada	**Qaddarka**
Kaashka la hayo	
Xisaabta(-aha) jeegga ee aad isticmaali karto	
Xisaabaha kaydka ee aad isticmaali karto	
Kale:	

Qaybta E, Liis garee kharashaadka ay sababtey musiibada ee uu qoyskaagu bixiyey ama filayo in uu bixiyo inta lagu jiro musiibadan. **Ha ku darin kharashyada la bixiyey ama uu bixin doonno qof ka baxsan qoyskaaga.**

Qaybta E - Kharashaadka	**Qaddarka**		**Qaddarka**
Cuntada ku burburtay ama ku xumaatay musiibada		Kharashka dayactirka ama beddelka alaabooyinka guriga ama goobta iskaa-u-shaqeysiga	
Daryeelka dadka kugu tiirsan ee musiibada sababta u ah		Kharashaad kale oo la xiriira musiibada (1)	
Kharashyada aaska / caafimaadka ee sababta u ah musiibada		Kharashaad kale oo la xiriira musiibada (2)	
Kharashyada guurista iyo kaydinta ee sababta u ah musiibada		Kharashaad kale oo la xiriira musiibada (3)	
Kharashyada hoyga ku-meelgaarka ah		Kharashaad kale oo la xiriira musiibada (4)	
Kharashka ilaalinta hantida inta musiibadu socoto			

Qaybta F – Digniinta Ciqaabta

Haddii qoyskaagu helo dheefo cunto, waa in uu raacaa xeerarka hoos ku qoran. Waxaan qoyskaaga u dooran karnaa dib-u-eegis Federaal ama Gobol muddo kadib marka aad hesho dheefahaaga cuntada si loo hubiyo in aad u qalanto gargaarka musiibada.

Ha bixinin macluumaad been ah ama ha qarin macluumaad si aad u hesho ama u sii hesho gargaarka cuntada.

Ha siin ama haka iibin faa'iidooyinkaaga cuntada ama kaarka Electronic Benefits Transfer (EBT) qof aan loo oggolayn in uu isticmaalo.

Ha u isticmaalin dheefaha cuntada in aad ku soo iibsato alaabooyin aan la oggolayn sida khamri ama sigaar ama tubaako.

Ha u isticmaalin dheefaha cuntada ama kaarka EBT ee qoys kale qoyskaaga.

Qaybta G – Caddeynta iyo Saxiixa	
Waxaan fahamsanahay su'aalaha ku jira codsigan iyo ciqaabaha ku xeeran qarinta ama bixinta macluumaad been ah. Qoyskeyga wuxuu u baahan yahay gargaar cunto degdeg ah oo sabab u ah musiibada. Waxaan caddeynayaa, anigoo og in beentu ay ciqaab leedahay, in macluumaadka aan bixiyay uu yahay mid sax ah oo dhammeystiran inta ay aqoonteydu tahay. Waxaan sidoo kale oggolaanayaa in la sii daayo macluumaad kastoo lagama maarmaan u ah xaqiijinta saxnaanta caddeyntayda. Waxaan fahamsanahay in haddii aan ku qanci waayo tallaabo kasta oo laga qaado kiiskeyga, in aan xaq u leeyahay in aan codsado dhageysi caddaalad ah, hadal ahaan ama qoraal ahaanba.	
Saxiixa Madaxa Qoyska ama Wakiilka Idman	Taariikhda

Iyada oo la raacayo sharciga xuquuqaha madaniga ah ee Federaalka iyo xeer-nidaamyada iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah ee Wasaaradda Beeraha ee Dalka Mareykanka (USDA), USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qaybqaata ama maamula barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal ahaan qaranka uu ka soo jeedo, diinta, jinsiga, naafonimo, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska/waalidka, dakhliga laga helay barnaamijka gargaarka dadweynaha, aaminsanaan siyaasadeed, ama aargudashada ama ciqaabta ka dhalata ka qaybgalka hore ee la xiriira xuquuqda madaniga ah, barnaamij ama waxqabad kasta ee uu qabto ama maalgeliyo USDA (inkasta oo dhammaan sababaha kor ku xusan aysan si siman u khusayn barnaamijyada oo dhan). Xalka iyo muddada kama dambaysta ah ee cabashada la gudbin karo ayaa ku kala duwan barnaamij ama dhacdo kasta.

Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab war-isgaarsiineed kale oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (t.a., Farta Indhoolayaasha ee Braille, daabacad waaweyn, cajalad cod ah, Luuqadda Dhegoolayaasha ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la soo xiriiraan gobolka ama hay'ad degaanka ah ee maamusha barnaamijka ama ha kala xiriirto USDA Adeegga War-lalinta Isgaarsiinta lambarkan 711 (cod iyo TTY). Intaa waxaa dheer, in macluumaadka barnaamijka lagu heli karo luuqado kale oo aan Af-Ingiriis ahayn.

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA, AD-3027, laga helo barta internetka ee Sida Loo Soo Gudbiyo Cabashada Takoorka Barnaamijka (https://www.usda.gov/about-usda/general-information/staff-offices/office-assistant-secretary-civil-rights/how-file-usda-discrimination-complaint/how-file-program-discrimination-complaint) iyo xafiis USDA kasta ama qor waraaq ku socota USDA ka-dibna waraaqda ku qor dhammaan macluumaadka lagu codsadey foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda ku socota USDA: (1) Boostada ugu dir: USDA Food and Nutrition Service, 1320 Braddock Place, Room 334, Alexandria, VA 22314; ama (2) email ugu dir: FNACIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov.

Hay'addan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.